

Loogu talagalay dadka bukaanka ah ee u qaata (Xarelto®, rivaroxaban) wadne gariirka

Wadno gariirka (Atrial Fibrillation) ayaa sababi kara inay xinjiro dhiig ku samaysmaan qolalaka wadnaha.

Haddii ay xinjirahan dhiiggu dibcaan oo u dhaqaaqaan maskaxda waxay sababi karaan faalig.

Xarelto waxay yareysaa halista xinjiraha dhiigga iyo faaligga iyada oo wax ka tarta ka hortagga xinjiruhu inay samaysmaan. Waraaqdani waxay sharaxaysaa waxa u wadne gariirku yahay iyo sida ku dawaynta Xarelto ay u shaqayso iyo sababta ay muhiimka u tahay.

Sababaha keenaha wadne gariirka

Wadne gariirka markay tahay garaaca wadnaha ayaan joogto ahayn oo mararka qaarkoodna degdega sababta oo ah guntinta moqorka kontoroosha dareennada korantada tagta qaybta sare ee wadnaha ayaan si fiican u shaqayn. Sida caadiga ah, halbowlaha wadnaha ayaa isku soo noqda marna kala baxa oo ku shuba dhiig labada qol ee wadnaha. Markay qolalku buuxsamaan ayay dhiigga ku shubaan jirka. Farsamadaas ayaa sida caadiga ah isku-dubbaridan iyo wax ku ool leh, laakiin markuu jiro wadne gariirku waxa ka kaca gudaha halbowlaha dareenno koronto meelo badan oo kala duwan, taas oo keenta wadno isku soo noqosho aan joogto iyo wax ku ool aan lahayn. Qolalaka wadnaha ayaan u awoodin sida habboon inay u buuxiyaan ama u faaruqiyaan, gariir awgeed. Taasi waxay waliba u horseeddaa isku-dubbaridnaan la'aan ficilka halbowlaha iyo qolalka wadnaha, sababtana inay qolalaka wadnuhu ayana u shubin dhiigga si wax ku oolku ku yar yahay. Garaaca wadnaha ayaa markaas laga yaabaa inuu lahaado labadaba tabar-darri iyo joogto la'aan, iyo mid aan iyo mararka qaarkood oo u walina aad u dhakhsado.

Calaamadaha

Calaamadaha ugu badan ee wadne gariirka ayaa ah wadnaha oo aad u garaaca iyo hab-garaac wadne oo aan joogto ahayn. Dadka qaarkood ayaa dareema daal, oo leh tamar yaraan oo si fudud u noqda kuwo neefsashadu ku adkaato, halka kuwe kalena ayna la kulmin wax calaamado ah haba yaraatee.

Wadne gariiga waxaa lagu arki karaa ECG

Dhakhtarku waxa uu u isticmaalaa ECG ah in la ogaado wadne gariirka. Haddii aad dareemayso wadne gariir marna yimaadda marna kaa taga, duube ECG 24-ka saac ama 48-saac ah ayaa lagu heli karaa dhibaataada.

Saddex nooc oo wadne-gariir

Wadne gariirka waxa badiyaa loo qaybiyaa saddex nooc, iyada oo ku xiran inata ay qaadato dhacdada wadno gariirku.

Wadne gariir ku-soo-bood (Paroxysmal) – waa dhacdooyin gaaban oo sida caadiga ah qaata kaliya dhowr daqiiqo. Mararka qaarkood dhacdooyinka ayaa dhici kara inay qaataan laba maalmood kahor intuuna wadnuhu ku soo noqon garaaciisii caadiga ahaa, loona yaqaan habgaraaca moqorka.

Wadne gariirka raaga – dhacdooyin in ka badan hal toddobaad qaata oo waxa laga yaaba inay isla markaaba iska tagaan. Waxa laga yaabaa in loo baahdo dawooyin ama cardioversion lagu joojiyo dhacdada.

Wadne gariirka joogtada ah – wadne gariirka aan tagin.

Daaweynta wadne gariirka

Iyada oo ku xiran darnaanta iyo muddada dhibaatooyinku ay jireen, waxa la heli karaa ka dawayn noocyo kala duwan ah. Si hoos loogu dhigo tirada garaaca wadnaha oo looga hortago dhacdooyin cusub, dawaynta ayaa badanaa lagu bilaabaa beta-blockers.

Beta-blockers ayaa ah dawooyin wadnaha ka caawiya dhiigga u shubo si ka fiican oo degganaan iyo wax ku ool leh. Mararka qaarkood beta-blocker-yada ayaa kaligood ku filan dawaynta, laakiin had iyo jeer sidaas ma aha, haddii loo baahdna kala xulashada ugu badan ayaa ah:

Korontayn wadne (cardioversion) – korontaynta wadnaha ayaa ah hab koronto lagu kiciyo habgaraaca moqorka. Habraac ayaa u baahan muddo gaaban oo suuxin ah.

Dawooyinka – haddii ayna korontaynta wadnuhu habboonayn ama isku dayku dhicisoobo, waxa laga yaabaa in la isticmaalo dawooyinka ka hor taga wadno gariirka (antiarrhythmics). Antiarrhythmics waa dawooyin ka caawiya wadnaha inuu dib isku-dejiyo oo u joogtaysto habgaraaca moqorka.

Labadan fursadood ee wax ka qabasho ayaa u baahan dawooyin ka hortago xinjiraha dhiigga. Wadne gariirka inta badan waxa soo raaca ku dawayn dawooyin nolosha oo dhan la qaato si looga hortago xinjiraha dhiigga iyo faaligga.

Wadne gariirka iyo dawooyinka xinjirta lidka ku ah

Wadne gariirka ayaa dadka bukaanka ah halis dheeraad ugu horseedi kara xinjirta dhiigga iyo faaligga. Gariirka ayaa wax u dhima shaqada wadnaha, taas oo micnaheedu tahay dhiigga aan si fiican oo waxtar leh uga shaqayn markuu maryo halbowlaha iyo qolalka wadnaha. Markuu qulqulka dhiigga ee wadnuhu hawlgabo, halista inay xinjiro samaysmaan ayaa kordhaysa. Haddii xinjir dhiig ama qayb ka mid ah xinjirtu dabacdo oo go'do oo ay raacdo qulqulka dhiigga oo ay tagato jirka, waxa laga yaabaa inay maskaxda ku dhegto oo ay faalig faalig u horseerddo. Waxa kaga qabashada dawooyinka lidka xinjirowga (dhiig khafiifiyeyasha) ayaa yareeya halista samayska xinjiraha dhiigga oo terabiguna waxa u hoos u dhigaa halista faaligga.

Xarelto

Xarelto waxay ku jirtaa qaybo dawooyin loo yaqaan lidka xinjirowga, dawooyinkaas oo loogu talagalay si looga hortago xinjiraha dhiig. Xarelto waxay yaraysaa kartida uu dhiiggu ku xinjiroobo, taas oo ka hortagaysa samaysa xinjiraha dhiigga. Waxayna ku hawlgashaa iyada oo is hortaagta walax ku jirata dhiigaa – walaxda xinjirowga Xa.

Xarelto waa daawo dhakhtar qoro.

Ku dawaynta Xarelto

Muddada dawayntu ay qaadato

Ku dawaynta Xarelto waa inay sii socotaa wali illaa inta ay jirto halis faalig.

Ku dawayn cimriga oo idil ah ayaa badiyaa loo baahan yahay. Ha joojin qaadashada Xarelto adiga oo aan marka hore la hadlin dhakhtarkaagamaadaama halista xinjirowga dhiigu sii kordhi karo.

Sida loo qaadto Xarelto

Qaado Xarelto hal jeer maalintii. Isku day inaad qaadato kiniika isla waqti isku mid ah maalin kasta si ay kuugu fududaato inaad xusuusato.

Waa muhiim in lagu qaato Xarelto cuntada si loo helo waxtarka ugu wanaagsan.

Cuntada iyo cabbitaanka

Waxaad cuni kartaa waxaad rabto; khamri cabbitaanka oo aan la isku badin saamayn kuma laha dawaynta.

Haddii aad ilowdo inaad qaadato kiniin

Isku day inaad qaadato kiniinka waqti isku mid ah maalin kasta, sida quraacda ama cashada. Haddii aad ilowdo inaad qaadato kiniinkaaga, qaado sida ugu dhaqsaha badan ee aad xusuusto isla maalintaaas. Haddii aad ilowdo maalin buuxda, ku sii wad maalinta xigta sidii hore adiga oo qaata hal kiniin maalin walba. Marnaba ha labanlaaban qiyaastaada dawada si aad uga soo kabato qaadasho kiniin ku seegtay.

Haddii aad qaadato Xarelto xad dhaaf ah

La xiriir isla markaaba dhakhtarkaaga haddii qaadatay kiino aad u badan. Halista dhiigbaxa ayaa sii koradha haddii aad qaadato inaad aad u badan oo Xarelto ah.

Saamaynta soo raacda ah ee suurtagalka ah

Dhammaan dawooyinka waxay sababi karaan saamayn soo raac ah, inkasta oo ayna dhammaan isticmaalayaasha saamayn. Kala xiriir rugtaada caafimaad wixii talo ah haddii aad isku aragto wax dhiig oo ka soo baxa meelaha ay ka midka yihiin sankaa, afkaaaga, marinkaaga kaadida ama marinkaaga xiidmaha. Raadso daryeel degdeg ha (imerjansi) haddii aad isku aragto dhiigbax culus ama dhiigbax aan iskeed u joogsan. Haddii aad isku aragto ku dhufasho badan oo caloosha, xabadka ama madaxa ah, waa inaad sidoo kale raadsataa daryeel degdeg ah si loo hubiyo inaad lahayn dhiigbax gudaha ah. Sidoo kale raadso daryeel degdeg ah haddii aad isku aragto diciifnimo, daal, doorsoon maqaar, dawakhaad, madax xanuun, barar aan la garanayn sababta, neefta oo ku qabata, xabad ama laab xanuun aan caadi ahayn, astaamahaas oo u noqon kara calaamado dhiigbaxa.

Is-dhexgalka dawooyinka kale

Ha qaadan dawooyinka kale ee lidka ku ah caabuqa sida Voltaren, naproxen ama asbiriin adiga oo aan marka hore weyddiin dhakhtarkaaga. Waxa laga yaaba inaad Xarelto la qaadan karto dawooyinka xanuunka ee leh paracetamol (acetaminophen) sida Alvedon ama Panodil. Waa muhiim inaad dhakhtarkaaga u sheegto dawooyinka kale ee aad qaadato, oo ay ka midka yihiin dawooyinka dukaanka laga iibso iyo dawooyinka walaxaha dhirta ka samaysan. Dhakhtarkaaga ayaa go'aamin doonaa daryeelka la tilmaamay.

Xaddidaadka

La xiriir dhakhtarkaaga kahor inta aadan qaadan Xarelto haddii:

- ◆ aad alerji (xasaasiyad daran) aad ku leedahay rivaroxaban ama wax kale oo ku jira Xarelto
- ◆ aad leedahay dhiigbax badan ama dhiig kaa socodo
- ◆ aad qabto cudur beerka ah oo halis kaaga dhigaya inaad yeelato dhigbax koradhsan
- ◆ aad uur leedahay ama ilmo nuujis aad tahay

Sidoo kale la xiriir dhakhtarkaaga haddii aad qorshaha ay kuu jirto inaad uur yeelato.

Xarelto kahor qalliinka, cad ka goynta baarista ama habraac caafimaadka ilkaha ah oo lagu talagalo

Haddii lagugu samayn doono qalliin, cad ka goyn baaritaan ama habraac caafimaad ilkaha ah sida ilig ka saarka oo lagu talagalo, waa inaad la xiriirtaa oo aad u wargalisaa dhakhtarkaaga ama dhakhtarkaaga ilkaha inaad qaadato Xarelto.

Baaritaan caadiga ah ee dhiigga looma baahna

Saamynat Xarelto aad ugmakal kala duwana shaqsiyaadka. Xarelto waa in lal qaataa cuntada si loo hubiyo si fiican u dhaafka dawada, laakiin looma baahna cunto ama arrimo iskugu hagaajin gaar ah. Sidaas darteed uma baahnid baaritaan dhiig oo joogto ah si loola socdo saamaynta. Adiga oo qaata qiyaas isku mid ah oo Xarelto maalin kasta waxaad heli doontaad ka ilaalinta la filayo ee xinjiraha dhiiga oo markaa yareen doono halista faaligga.

Kaarka macluumaadka loogu taalagay badbaadada

Waxaad ka heli doontaa kaar dhakhtarkaaga ama kalkaaliyaha oo wata macluumaad ku saabsan ku dawayntaada Xarelto. Waa inaad kastaad soo qadataa kaarkaaga markaas ay booqaneysay ama dawayn aad ka heleyso, dhakhtar, dhakhtarka ilkaha ama daryeel bixiye kale.

Wax su'aalo ah oo ku saabsan Xarelto ma qabtaa?

Kala hadal dhakhtarkaaga ama kalkaaliyaha caafimaad ee rugta caafimaadka ee maaraynaysa dawayntaada.

Si aad u hesho macluumaadka oo dhammaystiran, fadlan fiiri qoraalka yar ee ku lifaaqan.

Ma rabtaa xusuusin maalinle ah oo lagu helo farriin tekist ahaan. Iska diiwaangali halkan www.xarelto-patient.se

Fadlanxusuusnow la soco in adeeggaan uu yahay Af-Iswidhish.

Xarelto (rivaroxaban), antitrombotiskt medel, R (B01 AF01). Tabletter 15 mg och 20 mg (F). **Indikation:** Förebyggande av stroke och systemisk embolism hos vuxna patienter med icke-valvulärt förmaksflimmer med en eller flera riskfaktorer, såsom hjärtsvikt, hypertoni, ålder ≥ 75 år, diabetes mellitus, tidigare stroke eller transitorisk ischemisk attack. **Dosering:** rekommenderad dos 20 mg en gång dagligen, vilket också är den rekommenderade maxdosen. För patienter med nedsatt njurfunktion (kreatininclearance 15–49 ml/min) är den rekommenderade dosen 15 mg en gång dagligen. Behandling med Xarelto kan initieras eller fortskrida hos patienter som kan behöva konvertering. Rekommenderad dos för patienter med icke-valvulärt förmaksflimmer som genomgår PCI (perkutan koronarintervention) med stentinsättning: Det finns begränsad erfarenhet om användning av reducerad dos, 15 mg Xarelto en gång dagligen (eller 10 mg Xarelto en gång dagligen för patienter med måttligt nedsatt njurfunktion [kreatininclearance 30–49 ml/min]) med tillägg av P2Y₁₂-hämmare i högst 12 månader till patienter med icke-valvulärt förmaksflimmer som behandlas med oral antikoagulation och som genomgår PCI med stentinsättning. **Kontraindikationer:** Aktiv, kliniskt signifikant blödning. Organskada eller tillstånd, som anses utgöra en

ökad risk för större blödning. Samtidig behandling med andra antikoagulantia. Lever-sjukdom förknippade med koagulopati och kliniskt relevant blödningsrisk inklusive cirrhotiska patienter med Child Pugh B och C. Graviditet och amning. **Varningar och försiktighet:** Xarelto ska användas med försiktighet hos patienter med kreatininclearance 15–29 ml/min. Användning av Xarelto hos patienter med kreatininclearance < 15 ml/min rekommenderas inte. Om blödning inte kan kontrolleras kan antingen tillförsel av ett specifikt medel för reversering av faktor Xa-hämmare (andexanet alfa), som motverkar den farmakologiska effekten av rivaroxaban, eller ett specifikt prokoagulat medel, såsom protrombinkomplexkoncentrat (PCC), aktiverat protrombinkomplexkoncentrat (APCC) eller rekombinant faktor VIIa (r-FVIIa), övervägas. Datum för senaste översynen av produktresumén oktober 2019. Bayer AB. Box 606. 169 26 Solna. Tel. 08-580 223 00. För ytterligare information samt priser se www.fass.se. Före förskrivning vänligen läs produktresumén på fass.se.

▼ Detta läkemedel är föremål för utökad övervakning. Hälso- och sjukvårdspersonal uppmanas att rapportera varje misstänkt biverkning till Läkemedelsverket.

Översättningen är utförd av *TransPerfect Translations AB*, ett professionellt ISO 9001:2008-certifierat översättningsföretag med kompetens att översätta från engelska till somaliska. Vi intygar härmed att denna översättning, enligt vår professionella kunskap, motsvarar dokumentet *Patientbroschyr (SPAF) på engelska*.



Bayer AB
Box 606, 169 26 Solna
Tel: 08-580 223 00